

Dugsiyada waxay u wareegayaan waxbarashada guriga ee Kaalgari (Calgary)

Abriil 14, 2021

Waxbarashada Alberta waxay ogolaatay codsiyada ka yimid iskuulada dowliga iyo kuwa Kaatooliga ah ee Kaalgari (Calgary) si ku meelgaar ah loogu wareejiyo Fasalada 7aad iyo 12aad ee waxbarashada guriga.

Ardayda Fasalada 7aad ilaa 12aad ee Guddiga Waxbarashada Kaalgari (Calgary) iyo Degmada Kaalgari (Calgary) ee Dugsiga Kaatooligga waxay u wareegi doonaan waxbarashada guriga laga bilaabo Abriil 19 ilaa laba toddobaad.

Go'aannada lagu ansixinayo codsiga guddiga dugsiga ee loo beddelayo waxbarashada guriga ee tixgelinta hawlgalka waxay ku saleysan tahay afar shuruudood:

- Yaraanta Macalinka badal kara macalinka maqan.
- Tiro aad u badan oo ardayda iyo shaqaalaha ku jira karantiil ama go'doomin.
- Codsiyada dhowaan ka yimid guddiga ee beddelashada muddada gaaban ee tiro ka mid ah dugsiyadooda.
- Xaaladaha muhiimka ah ee KOOFID-19 ee bulshada dhexdeeda ah.

“In kasta oo qof walba uu dooran karo waxbarashada iskuulka, haddana qaar ka mid ah guddiyada dugsiyada waxay la tacaalayaan culeysyo xagga hawlgalka ah sababo la xiriiira kororka kiisaska KOOFID-19 ee bulshada. Badbaadada ardayda iyo shaqaalaha ayaa ah ahmiyadeyda koowaad, taas oo ah sababta aan uga jawaabayo codsiyada guddiyada isla markaana aan ixtiraamayo ismaamulkooda. Markaan helno hannaan cad oo jira, waxaan siinaynaa fududeyn ay ugu wareegaan waxbarashada guriga marka loo baahdo.”

Adriana LaGrange, Wasiirka Waxbarashada

Guddiyada iskuulku way sii wadi karaan inay codsadaan iskuul dhan inuu si ku meel gaar ah ugu dhaqaaqo waxbarashada guriga sababo la xiriiira howlahooda awgood gobolkana wuxuu sii wadayaa inuu si dhow ula shaqeeyo guddiyada iskuulka si loo taageero ardayda iyo qoysaska. Go'aamada lagu rarayo qayb ka mid ah iskuulka, sida hal darajo, waxay sii ahaaneysaa go'aanka guddiga iskuulka. Ilaa hadda, Caafimaadka Alberta uma baahna wax xirnaasho dugsi sababo caafimaad awgood.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka iyada oo tilaabooyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar, iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Laba guddi dugsiyeed ayaa si ku meelgaar ah loo siiyey iney waxbarashada guriga cedeshaan, laga bilaabo Isniinta, Abriil 19keeda: Guddiga Waxbarashada Kaalgari (Calgary) iyo Deegaanada Dugsiyada Kaatooligga ee Kaalgari (Calgary) (oo ay ku jiraan dugsiyada ku yaal Eerdari (Airdrie) iyo Kokreen (Cochrane).

- Guddiyada iskuulka waxay laxiriiri doonaan ardeydooda, waalidiintooda, macalimiintooda iyo shaqaalahooda wixii faahfaahin ah ee ku saabsan kala guurka
- Ardayda naafada ah ee u baahan taageero gaar ah waxay sii wadi karaan inay waxbartaan oo ay ka helaan adeegyo shaqsi dugsiga, iyadoon loo eegin u wareegidda xagga waxbarashada guriga.
- Qiyaastii boqolkiiba 81 dugsiyada ku yaal Alberta hadda ma laha digniin ama dillaac.
- Xilligan, sagaal dugsi ayaa si ku meelgaar ah wax uga baranaya guriga/khadka tooska ah sababo la xiriira tixgelinta howlahooda.
- Kiisaska socda ee laxiriira dugsiyada waxay gaarayaan ilaa 0.3 boqolkiiba ardayda iyo shaqaalaha.

Xogta la xiriirta

- [Waxbarashada fasalada K-12 inta lagu jiro KOOFID-19 \(K-12 learning during COVID-19\)](#)
- [Hagitaan iyo talaabooyin caafimaad KOOFID-19 oo loogu talagalay fasalada K-12 ee iskuulada \(COVID-19 guidance and health measures for K-12 schools\)](#)

Weydiimaha warbaahinta

[Nicole Sparrow](#)

780-720-1915

Xoghayaha saxaafadda, Waxbarashada

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dawladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.